Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Date: 26/08/2013 التاريخ:

Press Statement	War Saxafadeed	بيان صحفي

WAR KU SAABSAN DASTUURKA KU MEEL GAARKA AH

Dhowr goor ayaa warar kala duwan laga soo saaray eedeymo la xiriira in la gacan togaaleeyay ama si aan sharciga waafaqsaneyn wax looga beddelay Dastuurka ku meel gaarka ah.

Baarlamaanka Federaalka ah iyo Mudanayaashiisa sharafta lihiba aad ayeey uga war qabaan meelaha la saluugi karo ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya, iyo weliba in qoddobada qaar iska horimanayaan. Sababahaa awgood ayaa Baarlamaanka Federaalka ihi u siiyay mudnaanta kowaad ee degdegga ah hawsha dib-u-eegista dastuurka (constitutional review process.) Lixddii Juun ee sannadkan ayaa Guddida Baarlamaanka ee Dibu u Eegista iyo HIrgelinta Dastuurku ay si rasmi ah ugu daah fureen geeddi socodka dib u eegista iyagoo hawshaa u soo bandhigi doona xubnaha Baarlamaanka oo dhan iyo Dadweynaha Soomaaliyd meel ay joogaanba, kana tala gelinaya.

Waqtigan xaadirka ah waxaa muhiim ah in aynu xoogga saaro dadaalka dib u dhiska hay'adaha Soomaaliyeed. Dawladda Fedraalka ah iyo Baarlamaanka Federaalka ahba waxaa lagu dhisay nidaam dastuuri ah iyadoo la raacayo Dastuurkeena ku Meel Gaarka ah. Dastuurka Federaalka ah waxaa la ansixiyay bishii August 2012, waxaana Ansixiyay Golihii Qaranka ee Ansixinta Dastuurka (National Constitution Assembly) kaasoo ka koobnaa wakiilo ka kala yimi dhammaan qaybahaan Soomaaliya. Inkastoo uu dhaliilihiisa leeyahay, Dastuurka ku meel Gaarka ihi waa dhokomentiga keliya ee inoo saamaxaya in aynu helo asaas sharci oo xalaal ah oo dawladnimada Soomaaliyeed idil ahaanteed saldhig u noqda. Sidaa daraadeed waa in aan shaki iyo su'aal la gelin sharcinimada dastuurkan.

Waxaa dadka qaar ku doodeen in nuqulka Dastuurka ku Meel Gaarka ah ee ay Saxeexayaashii oo dhami ay ku saxeexeen Addisababa Dhammaadkii Khariidadada soo Gunaanadka ku Meel Gaarka 11kii bishii Meey, in uu yahay nuqulka keliya ee sharciga ah ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah. Waa arrin nasiib darro ah oo aan ku fadhiyin xaqiiqda. Heshiiskii lagu gaaray shirkaa Addisababa waxaa buriyay oo ka qaalib noqday heshiis kale oo lagu galay Nairobi bishii Juun, 2012.

Bishii Juun 2012, dhammaan saxiixayaasha Khariidadda dhammaystirka Ku Meel Gaarku waxay ku heshiiyeen in ay aabuuraan Guddida Hawl Wadeenada Farsamo (Technical Facilitation Committee) oo loo igmaday dhammeystirka qoraalka Dastuurka, ka bacdina loo Gudbiyo qoraalka Golaha Qaranka ee Ansixinta Dastuurka. Guddida Hawlwadeenada Farsamo waxaa si rasmi ah loogu aasaasay Borotokoolka (xeerka) loo yaqaan Borotokoolka Asaaska Guddida Hawl Wadeenada Farsamo eelagu soo saaray xeer Madaxweyne iyadoo la raacayo heshiiskii Nairobi. Waxaa intaa dheer, Guddida Hawlwadeenada Farsamo waxay ka koobnaayeen wakiilo ay soo dirsadeen, meteleyeyna Saxiixayaasha Khariidada Dhammeystirak ku Meel Gaarka , oo ay ku jirto Xukuumadda Dawladda Puntland.

Sidaa daraadeed, go'aamada ay qaateen Guddida Hawlwadeenada Farsamo , waxay ku fadhiyeen rabitaanka iyo hagitaanka, waxayna metelayeen danaha dhamman saxiixayaasha oo ay ku jirto xukuumadda Dawladda Puntland. Iyadoo arrintu sidaa ah, kala guurkii haatan wuu dhammaaday, heshiisyaddii Khariidadda Dhammeystirka Kala Guurkuna waa kuwo waqtigooddii dhammaaday. Manta Soomaaliya waxay leedahay nidaam siyaasadeed oo cusub.

Si kastaba ha ahaatee, geeddi socodkii dastuurka ee Soomaaliya weli muu dhammaan. Dib u eegis ayaa lagu sameynayaa Dastuurka ku Meel Gaarka ah ee Soomaaliya, hawl badan ayaa ina sugeysa si loo soo gunaanado geedi socodka dib u eegista. Waxaa lagu jiraa marxalad u baahan in hawsha laga wada qayb qaato si macno lehna looga wada hadlo laysulana qabto hawsha. Waa fursaddii lagu sixi lahaa wax walba oo la saluugsan yahay, lana toosin lahaa meelaha uu ka liicsan yahay dastuurku. Waa waqtiggii tubta saxan lagu ridi lahaa lana soo gabagabeyn lahaa dastuurka.

Si loo sugo in Dastuurka ku meel Gaarka ihi uu metelo dhammaan danaha inta uu khuseeyo danahoodana uu taabanayo, iyo dadweynaha ku nool gobol walba oo soomaaliya ah, Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya wuxuu si buuxda diyaar ugu yahay oo ka go'an in uu si ballaaran u sameeyo wada tashi, uuna sugo in uu siiyo qof walba fursad uu kaga qayb qaadan karo. Waxa kale oo dadweynaha Soomaaliyeed loo soo bandhigi doonaa qoraalka dastuurka kama danbeysta ah si loogu qaado afti dadweyne oo dalk oo dhan ka dhacda. Sidaa daraadeed go'aanka kama danbeysta ah ee Dastuurka Soomaaliyeed waxaa iska leh, ugu danbeynta, dadweynaha Soomaaliyeed, mana laha go'aanka maamulada dalku heer walba oo ay tahay dawladdaasi.

Waxaanu rumeysan nahay in sida keliya ee guul loo hanan karaa ay tahay haddii dhammaan ummadda Soomaaliyeed oo dhami ay ka qayb qaadato hawshan dib u eegista Dastuuraka, tasoo horseedi karta in la helo Sommaaliya mideysan oo xoogweyn. Sidaa awgeed, waxaanu ugu baaqeynaa Soomaalida oo dhan in ay ka faa'iideystaan fursaddan oo ay si wax ku ool ah uga qayb qaataan geeddi socodka dib u eegista dastuurka , aynuna wada jir uga shaqayno in mustaqbal wanaagsan ay hesho Soomaali oo dhami.

Wabilhaahi towfiiq.

E-mail. media@parliament.gov.so Website: www.parliament.gov.so